

MAQAL LA'AANTA HALKA DHEG

Macluumaadka qoysaska iyo daryeeleyaasha



Marka hal dheg maqalkeedu ka duwan tahay dhegta kale, waxa la yiraahdaa maqal la'aanta halka dheg.

Maqalka la'aanta halka dhinac waxay u dhaxeyn kartaa heer fudud ilaa heer aad u daran.

Ixtiraamka Aqoonsiga shakhsiyeed

Waxaan ixtiraameynaa wixii ay dadku sheegtaan ee ah aqoonsigooda. Dadku waxay isu aqoonsan karaan in ay yihiin dhagool, qof dhega culus, qof aan dhegaha wax ka maqlin, qof maqalkiisu dadka ka duwan yahay, iwm. Waxaa laga yaabaa in aad aragto ereyada "deaf and hard of hearing (dhagool iyo qof dhega culus ama DHH)," oo loo adeegsanayo si guud-ahaaneed. Waxaad isticmaali kartaa ereyga "maqal la'aanta" marka baaritaan ahaan wax lagu soo ogaado.

Sheegista Maalgelinta

Dhaqaalaha waxaa ku taageeray Health Resources and Services Administration (Tasiilaadka Caafimaadka iyo Maamulka Adeegyada ama HRSA) ee Health and Human Services (Waxda Caafimaadka iyo Adeegyada Dadweynaha ee Mareykanka ama HHS) oo waxay qeyb ka tahay abaalmarin gaareysa \$102,742 oo maalgelinta ilaha aan dowliga ahayn waa 0%. Waxyaabaha qoraalka ah waa wax ay dad qoreen ee ma aha wax ka turjumaya aragtida rasmiga ah ee HRSA, HHS, ama Dawladda Mareykanka. Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan booqo HRSA.gov.

Maxaan u qaban karaa ilmahayga ay hayso maqal la'aanta halka dheg?

In aad ballan uga qabato xirfaflaha maqalka ee aad u geysato

Si joogto ah ballan uga qabo xirfaflaha maqalka si aad u habsato maqalka ilmahaaga. Xirfaflaha maqalka ayaa kuu sheegi doona inta jeer ee aad soo celcelin doonto, oo waxay ku xiran tahay xaalka ilmaha. Haddii ilmuhu aad u yar yahay, ballamo badan oo lagula socdo ayaa loo qaban karaa.

Xirfaflaha maqalka ayaa kaala hadli doona qalabka maqalka, haddii loo baahdo.

Ballanta Cusub:

Talada xirfaflaha maqalka:

In laga daaweeyo infakshanka dhegaha



Haddii aad u maleyneyso in uu infakshan ilmahaaga uga dhacay mid ka mid ah labada dhegood, si degdeg ah ugu gee dhakhtarka!

Isticmaalka qalabka difaaca dhegaha



Dhegaha ilmahaaga ka difaac qeylada keenta dhega la'aanta. U xir wax u difaacaya maqalka (wax la geliyo ama la dulsaro dhegaha) marka ilmahaagu u dhow yahay qeylo weyn ama muustiko.

In lala socdo barashada luuqadda ee ilmaha



Hubso haddii uu ilmuhu gaarayo heerka laga rabo ee barashada luuqadda. Kala hadal xirfaflaha maqalka dhegaha 6dii biloodba mar si aad u habsato in maqalka ilmahaagu gaaray meeshii laga rabay.



Ka yaree qeylo kale oo ka cod dheer waxa ilmuhu maqlayo si uu maqalku ugu ficnaado. Siyaabaha aad sameyn karto waa in aad u dhawaato ilmaha iyo in aad joogtaan meel iftiin fiican si aad isugu muuqataan.

Toddoba ka mid ah 10kii qoys oo ku nool Minnesota dhallaanka/ilmahooda yaryar ee ay hayso maqal la'aanta halka dheg iskuulkooda ayaa goor hore lagu ogaadaa si wax loogu qabto.

Mid ka mid ah 10kii ilmood oo ku nool Minnesota waxaa marka hore lagu arkaa maqal la'aan sababteedu tahay maqal la'aanta halka dheg.

Maxay muhiim u tahay in wax laga qabto maqal la'aanta halka dhinac ee ilmaha?

Badqabidda



Kala-duwanaanshaha maqalka ee u dhexeeya dhegaha waxay adkeyn kartaa in la ogaado jihada uu dhawaaqu ka imaanayo.

In ilmaha lagu caawiyo isticmaalka dareenka oo dhan, sida aragga, waa waxa ku caawin doona in ay bartaan sida ay badqabid ugu dhex heli karaan bulshada dhexdeeda.

Waxbarashada



Kala-duwanaanshaha maqalka waxay saameyn kartaa luuqadda iyo waxbarashada. Daraasado ayaa si joogto ah ugu talinaya carruurta ay hayso maqal la'aanta halka dheg

in ay halis weyn ugu jiraan in ay ku dhacdo dibudhac ah xagga luuqadda iyo dhibaatooyin ah waxbarashada marka loo barbar dhigo carruurta uu maqalkooda caadiga yahay.

Dedaalka Dhageysiga iyo Daalka



Ilmaha way ku adkaan kartaa maqalka dadka ka hadlaya maqal la'aanta, ama maqalka dadka marka uu joogo meelaha buuqa badan sida fasalka ama barxadda ciyaaraha.

Waxaa laga yaabaa in ilmuhu maqli waayo qaybo ka mid ah waxa loo sheegayo – ee meel fog, meel buuq ah, ama marka aysan arkeyn qofka la hadlaya. Waxa kale oo ku adkaan karta in ilmuhu maqlo jihada ama in uu fahmi waayo qof cod hoose kula hadlaya. Waxaa laga yaabaa in ilmuhu kordhiyo dedaalka dhageysiga oo uu xaaladahaas ku daalo iyadoo ku keenaysa niyadjabid iyo habdhaqanka oo iska beddela



Ka warran qalabka maqalka?



Haddii loo baahdo, xirfadlaha maqalka ayaa ku fahamsiinaya qalabka caawinta maqalka. Waxyaabaha loo hayo waxa ay ku xiran yihiin baahida ilmaha iyo heerka maqalka. Xirfadlaha maqalka ayaa kuu soo heli kara qalab laga soo amaahdo gobolka.

Tusaaleyaasha qalabka maqalka waa caawinta maqalka, qalab ka gariirsiiya lafaha, qalab ah maqalka oo la geliyo dhegta, hab ah makarafoon, iyo makarafoon ah fasalka oo dhan.

Nagala soo xiriir

Minnesota Hands & Voices

Ku xirnow waalidka kale ee haysta ilmo ah dhagooleyaal iyo kuwa dhaga culus.

651-265-2435 (Cod Keliya)
MNHV@lssmn.org
www.lssmn.org/mnhandsandvoices

Early Hearing Detection & Intervention (Ogaanshaha Hore & Waxqabadka Maqalka Dhegaha ama EHDI)

Faahfaahin ka hel barnaamijka EHDI ee Minnesota oo raadso tasiilaadyo dheeraad ah.

www.health.mn.gov/improveEhdi
MDH/CYSHN
PO Box 64975,
St. Paul, MN 55164-0975

Si aad macluumaadkan ugu hesho qoraal ah hab kale, soo garaac 651-201-3650

Barnaamijyo iyo macluumaad bilaash ah ayaa jira oo ka caawinaya ilmahaaga maqalka.

Help Me Grow

Carruurta lagu arko maqal la'aan ah hal dhinac waxay xaq u yeelan karaan wax-qabad hore oo bilaash ah oo ay ka helaan degmada iskuulka oo waxaa loo soo maraa Help Me Grow. Shaqaalaha degmada ayaa kaala shaqeyn doona in qorshe lagu saameeyo. Carruurta ka weyn 5 jirka waxaa la soo marsiin karaa dugsiga hoose ee ay ku jiraan.

1-866-693-GROW (4769)
www.helpmegrwmn.org



Follow Along Program

La soco meesha ilmahaagu joogo si aad u aragto haddii uu u korayo oo u dhaqmayo sida ilmaha kale ee ay isku da'da yihiin.

www.health.state.mn.us/mnfap

